Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qorolaaka kal.6-aad
Documentiga Kal.6-aad/kul-5aad **19/05/2015**

Kalfadhiga 6-aad
Kulankiisa 5-aad Saac.Fur. 12:15gh-Saac, Xir.2:10gd.
Guntinta (Qourum) Xildh 141
Ajendaha

1. **Furitaanka Aayadaha Qu'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Sii wadida dooda mooshinka dhismaha golaha wakiilada maamul-goboleedka ku meelgaarka ee jubooyinka(jubba),**

1). Shiguddoomiye Guddoomiyaha Baarlamanka JFS Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaar.

Waxaa Shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari), waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna akhriyay Xildhibaan Sheekh shaacir.

2). Guddoomiyaha wuxuu sheegay in shirka furay yahay uuna ka codsaday Xidhibaanada in doodii shalay sii socoto uu yahay ajandaheena maanta, Xildhibaanada ay ansaxiyaan, Xildhibaanadana way ansixiyeen.

3). Guddoomiyaha wuxuu kaloo sheegay in uu u mahad celinaayo isagoo ku hadlaayo magaca Golaha shacabka intii ka qeybqaadatay samatabixinta qaxootiga Soomaaliyeed ee Yeman. wuxuu intaa ku darey in xafiiskiisa ay soo gaareyn hidise-sharciyeedyo aad u badan kuwaasoo kala ah:-

1. **Hindise-sharciyeedka Argagisada**
2. **Hindise-sharciyeedka xuquuqul-insaanka**
3. **Hindise-sharciyeedka Warbaahinta**
4. **Hindise-sharciyeedka shaqaalaha Ajanabiga**
5. **Hindise-sharciyeedka Guddiga madaxa-banaan ee Doorashooyinka**
6. **Hindise-sharciyeedka Guddiga Madaxa-banaan ee Xuduudaha Federaalka**
7. **Hindise-sharciyeedka Adeega Garsoorka**

Iyo waxaa kaloo yaala qaraaro badan oo u baahan in dusha layska saaro ,

4). Wuxuu intaa ku darey in Baarlamaankana saacadaha uu shaqeeyo aad ay u yaryihiin, wuxuuna ka codsaday Xildhibaanada in Qod. 16-aad Xeer-hoosaadka garab lagu siiyo, oo lagu abaalmariyo ,Xildhibaankii shaqadiisa ka maqnaada in laga jaro lacagtiisa mushaarka $100 doolar, kadib, Guddoomiyaha cod ayuu galiyey arinka lacag ka jarista Xildhibaanada wuxuuna u dhacay sida tan:

137 wey ogolaadeyn

5 wey diiday

Wax ka aamusayna ma jirin.

5). Intaa kadib waxaa bilaabatay doodii Xildhibaanada:

Xildh.Cumar Cali

Wuxuu sheegay in uu ka mid ahaa xildhibaanadii saxiixay mooshinka ku aadanaa arrimaha Maamul Goboleedka Jubba- Land, waxa meesha ka dhacay mayihiin wax cadaalad ah mise waa waxaan cadaalad ahayn. Runtii waxa meesha ka dhacay maysan aheyn wax caddaalad ah . waxaana lagu saleeyay hal cid oo kaliya, wuxuuna sheegay in ciladdaas ay sababtay in Dowladda meesha ka jirta lagu kalsoonaan waayo lana aqoonsan waayo..

6). Guddoomiyaha wuxuu sheegay in Baarlamaankan uu yahay hooyada Baarlamaanada ka jira Soomaaliya waxaana loo baahan yahay in la sheego wixii toosin ah.

Xildh. Dhuxulow(point of order)

Wuxuu sheegay in Arinka qaxootiga ka imaanaya Dalka Yamen aanan nooga filnayn kaliya inaan u mahad celino ciddii ka qeybqaadatey ee waa in layska uruuriyaa kharash lagu taakuleeyo dadka Soomaaliyeed ee ka soo barakacay dagaalka Dalka yaman ka dhacaaya.

Xildh. Guure

Wuxuu sheegay in ay muhiim tahay in la saxo haddii ay cabasho timid, **wuxuuna soo jeediyay in la qabto guddi ka kooban odoyaal, gole Baarlamaan iyo Gole Wasiiro, ay xaliyaan loona tilmaamo wixii qaldan**

7). Guddoomiyaha wuxuu sheegay in maanta ay soo gaartay Golaha Baarlamaanka., **in xirta Macalin-nuur ay gar-gaar u fidiyeen Maxaabista ku jirta xabsiga dhexe ee Muqdisho ayna rabaan iney dib u dhisaan Xabsigaas.**

Xildh. C/llaahi Jaamac,
Wuxuu sheegay Sannadkii 2013 iyo 2014 xukuumadihii wagaas jiray ay dhisayn maamulada qaldan ee hadda jira , waxaana u baahanahay in maamuladaas la saxo ,143-da uu dastuurka Dalka ka kooban yahay ,haduusan na anfaceynin waa arin yaab leh , **wuxuu soo jeediyey in arinkaan loo saaro Gole Wasiiro iyo Guddi ka socdo Madaxweynaha, wuxuuna Guddoonka ka codsaday in la raadiyo nidaamkii wadanka uu Dowlad ku noqonlahaa.**

Xildh, Maxamuud Dhux
Wuxuu sheegay in ay haboontahay in loo hadlo si Xildhibaanimo ee aan loo hadlin ku qabso ku qadi meysid, Baarlamaanka Juba-land wuxuu ku dhisanyahay sharci waxaana u dhan qolooyinka degga gobolka juba-land oo dhan.

Xildh.Maxamud Cali magan
Salaan kadib, wuxuu sheegay in gobolka juba waxa ka dhacay ay yihiin gobood fal-xunQod.49-aad Far.4-aad iyo 5-aad ee Dastuurka ay ka hadleyso in Dawladihii KMG ahaa ay magacaabeyn 1990-kii kadib, Degmadda Salakle uuna magacaabey Madax-weynihii hore Mudane Sheekh Shariif Sh. Axmed , kadibna lagu daray Jubooyinka. waxaana loo gafay Dastuurka KMG. **wuxuuna soo jeediyay in cod lageliyo,**

Xildh. Samaan Maxamed Sheekh Daahir
Salaan kadib, wuxuu sheegay inuu ka mid yahay Xildhibaanadii kasoo jeeday Gobolka Juba hoose ,waxaana la sheegay in juba ay Dastuur leedahay, wuxuu kaloo sheegay in aysan jirin in maanta aysan jirin wax Dawlad-goboleed ah ay jirto Maamul goboleed, **wuxuu soo jeediyay haddii la rabo in wax ladhisho anagaba waan rabnaa, waa in la dhisaa maamul loowada dhanyahay.**

Xildh. Cabdi Kaafi
Wuxuu soo sheegay in Juba-land kaliya aysan ka jirin cadaalad daro ee goboladoo dhan ayey ka jiraan Cadaala daradaas, **wuxuu soo jeediyay in aan la kala qob-qobin Ummadda ee la midoobaa kadib, ayaa xal la raadin karaa.**

Xildh.Nuuraani Bakar
Wuxuu sheegay in arinka meesha ka dhacay ay tahay nasiibdaro heysata dadka degan juba-land waxayna fool ka fool u wada kulmeyn Madax-weynaha Juba-Land Mudane Axmed Madoobe. Xitaa ay dhacdey in aan la ixtiraamin muwaadiniinta degan oo xaqoodii la duudsiiyay.**wuxuu soo jeediyay in aan ku dadaalno sidii aan ku sixi laheyn qaladkaas dhacay.**

Xildh. Sheekh shaacir.

Salaan kadib wuxuu sheegay in uu ka mid ahaa xubnihii saxiixay mooshinka mar aan la kulmay maamulka juba ayaan sugeynay inaan la kulano IGAD mudo usbuuc ah weyna diiday oo waxay tiri wixii halkaas ka dhaca waa inaad ku qanacdaan haddii kale waan sanduuq la keenaa. **Wuxuu soo jeediyay in arinka meeshaas ka dhacay la saxo.**

Xildh, Mahdi Cali Cusmaan

Wuxuu sheegay Baarlamaankani uu yahay kii wax saxi lahaa waxaana haayaa Documentigii lagu dhisay Maamulka Juba-land.**wuxuu soo jeediyay in guddoonka uu saxo arinka Baarlamaanka.**

Xildh. Aadan Maxamed Cali

wuxuu sheegay inuu ka mid yahay Xildhibaanada mooshinka soo saxiixay meesha waxaa ka maqan doorkii Dowladda JFS, **wuxuu soo jeedyay in loo codeeyo mooshinka Golaha yaala kadibna hoos laga soo dhiso.**

Xildh. Siciid Maxamed Cali

Wuxuu sheegay in mooshinka uu yahay shaqada Xildhibaanada waxa meesha ka dhacayna ay tahay xaqdaro, waxaa meesha ka cad in Soomaalinimada laga baxay. **Wuxuu soo jeediyay in gobolada ay ka jirto maamul xumo, waana in guddi loo saaro laguna soo caliyo Baarlamaanka**.

Xildh. Ibraahin Deyfallah

Salaan kadin, walaalayaal waxaa ina saran mas'uuliyad qaran haddana sida ay tahay aanan u gudanin illah ayaa naga awaal-marinaayo **Wuxuu soo jeediyay in shacabka degan laga qanciyo wax ay tabanayaan walaalayaal dalalaka aan dariska nahay waxaan usoo jeedinlahaa in ay dan ugu jirto nabada Soomaaliya ee walaalayaal naga daaya faragalinta,**

Xildh. C/raxmaan Suge

Wuxuu soo jeediyay in ergada loo diraayo xalinta qilaafaadka Gobolada laga dhigo cid aan u dhalan dhulkaas.

Xildh. Maxamed Iidle Geedi

Wuxuu sheegay in uu shirkii ka dhacay Juba-land uu goobjoog ka ahaa,ayna kasoo qeybgalayn beelaha deggan jubba land, Dastuurkana waxaana ansixiyay 500 xubnood oo u dhashay Jubaland. Wuxuuna sheegay in waxa meesha ka dhacay ay yihiin wax cadaalada ku saleysan weyna furan tahay in latoosiyo wixii qalad ah.

Xildh. Toow

Wuxuu sheegay in la qirsan yahay in meesha qalad uu dhaceyn takrifal awoodeedna uu ka jiro meeshaas dadbadan oo deegaan ah ayaa meesha laga sadbursaday waxaana aaminsanahay in si xagdaro ah loo sameeyay wakiilada Jubba-land, **wuxuu soo jeediyay in lagu noqdo oo loo qeybsado hab Categorey ah.**

Xildh. Sacdiyo Carees Ciise

Waxay sheektay inay ka mid ahayd xildhibaamadii tagay Jubba-land laguna qadiyay ayna raali ka tahay habka meesha loo maamulay aanan la dhihi Karin waa xaaraan.

Xildh. Ibraahim Yarow

Wuxuu sheegay in uu ayidsan yahay mooshinka ay soo qoreyn Xildhibaanada .**wuxuu soo jeediyay in Baarlamaanka uu go'aan ka gaaro.Kadibna loo codeeyo arinkaas , guddina loo saaro.**

Xildh.Nuur Maxamed Xuseen

Wuxuu sheegay in Baarlamanka uu ka kooban 275 Xubnood ,ayna waxba tareynin is-qabqabsi iyo qeylo .**wuxuu soo jeediyey in wax la toosiyo taas ayaana xal u ah muranka Maamulka Jubba ka dhaxtaagan Baarlamanka JFS.**

Xildh.Maxamed C/llaahi ,wuxuu sheegey ayagoo cabirayaan xaaladda Jubba ee maanta taagan in ay tahay mid murugo leh .Sannadkii 1902kii taariikhda dadkii meesha degenaa iyo siduu ahaa waa la ogsoonyahay. Arrin waa lagu qaldamaa ,haddana waa la saxaa . **wuxuu soo jeediyey in la kordhiyo Baaxadda Deegaanada Degmadda Salagle. Wuxuuna ku maah-maahey Gacmo Geel jire hoos ayaa loo dhaqaa, Maamulka Jubba dhab ahaan waalagu ilduufay waa in xal loo helaa.**

Xildh. Khadiija Maxamed Diiriye,Waxay sheegtay in marka hadlaayo in lays xaqdhawro oo lay ixtiraamo .Soomaali land waxay sameysteyn Gobolo Badan,kuwa qaar waa 3- Gobol ,gaarna waa 2-gobol ,**waxay soo jeedisey in laga digtoonaado Maamul Goboleedyadda, Xagga Guddoomiyaha Baarlamanka ayaa Maamul Goboleydyadda laga soo dhisey.**

8). Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey in Wasiirka Arrimaha Gudaha uu horyimaadGolaha Baarlamanka si wax looga weydiiyo Arrimaha Jubbooyinka .

Wuxuu kaloo intaa uu ku darey in Motionka Jubbooyinka doodeeda ay ka qeybqaateyn 41 Xildhibaan .

Kal .6-aad Kul.6-aad uu shir-guddoominaayey Guddoomiyaha Baarlamanka JFS. Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, wuxuu sheegay in shirka xiranyahay saacadu markey aheyd 2:10gd.